

Xeerka JB: Fursadaha Waxbarashada Simman iyo Xaqiraadla'aan

Dugsiyada Bulshada Denver waxaa ka go'an in ay siiyaan fursado waxbarashada simman oo barnaamijyada laga bixiyo Degmada oo aan loo eegin jinsiyada, midibka, lab-dheddig, galmada jinsiga, aqoonsiga jinsiga, heerarka laga roonaha, diinta, asalka dhalashada, abtirsiga, da'da, xaalada guurka, heerka uurka, heerka halyeeynimada, ama curyaanka (si wada jir ah, "Nooca Ilaalsan"). Ma jiro hadii kale arday u qalma oo laga reebayo ka qeybqaadashada, loo diido faa'dooyinka, ama waxaa lagu oogayaa xaqiraad sharci daro ah ama dhibaateyn sida waafaqsan barnaamij walba oo Degmada ama hawlaha ku saleysan heerka Nooca Ilaalsan.

Dugsiyada Bulshada Denver ("Degmada") waxay aqoonsanyihiin in dhibaateynta galmada in ay farageliso wax qabadka waxbarashada ardayda iyo wanaaga dareenka iyo jirka iyo ka hortaga iyo dib u hubinta dhibaateynta galmada ee Dugsiga waa muhiim si loo hubiyo xaqiraad sharci daro ah, deegaan ammaan ah oo ardayda ay ku baran karaan. Intaa waxaa dheer, dhibaateynta galmada waxaa loo aqoonsanyahay sida nooca xaqiraada galmada.

Fikradaha fursadaha waxbarashada simman iyo xaqiraadala'aanta waa in ay u hogaamisaa Guddiga iyo shaqaalaha guddiga dugsiga oo go'aamada la xiriira xarumaha Degmada, xulashada alaabaha waxbarashada, qalabka, iyo machadka, iyo sharuudaha saameynayo ardayda. Ardayda qabto naafada jirka iyo maskaxda oo noqoneysa curyaan waa in la siiyaa waxbarashada bulshada ku haboon oo bilaash ah, oo waafaqsan sharuudaha federaalka iyo sharciga dawlada iyo sharuudaha.

Dhibaateynta waa mamnuuc

Dhibaateynta ku saleysan shaqsigaa heerka Nooca Ilaalsan waa qaabka xaqiraada uu mamnuucay sharciga dawlada iyo federaalka. Ka hortaga iyo dib u eegista sida dhibaateynta dugsiyada waa muhiim in la hubiyo xaqiraadla'aan, deegaan ammaan ah oo ardayda ay ku baran karaan, shaqaalaha wuu shaqeyn karaa, iyo xubnaha bulshada waxay geli karaan iyo heli karaan Xarumaha Degmada iyo barnaamijyada. Dhammaan dhibaateynta nooca shaqaalaha degmada, ardayda, iyo dhinaca sadexaad, gabi ahaanba waa mamnuuc.

Dhammaan shaqaalaha Degmada iyo ardayda waxay wadaagaan masuuliyada lagu hubinayo in dhibaateyn aysan ka dhicin dugsi walbo oo Degmada ah, dhismaha walba oo Degmada ah, oo degmo walbo ama dugsi hawlaha-la xayiray ama dhacdada, dhismaha dugsiga goortii dhaqan noocaas ah uu ka dhaco dugsiga, ama machadka Degmada ama hawlaha aan machad ka aheyn ama dhacdada.

Sharuudaha la Ansixiyay

Kormeeraha guud ama wakiilka waa in ay hormariyaan nidaamyo noocaas ah sida laga yaabo in loogu baahdo fullinta xeerkaan waqti dheer sida nidaamyo noocaas ah waxay jooqta u tahay xeerarka Guddiga.

Tixraaca Sharciga.:

Cinwaanka IX ee Bedelada Waxbarashada, 20 U.S.C. § 1681

Qeybta 504 oo Xeerka Dhaqancelinta, 29 U.S.C. § 794

Cinwaanka VI ee Xeerka Xaquuqda Shicibka, 42 U.S.C. § 2000d -R1
Warbixinta Dhaqanka Xeerka Xaqiraadla'aanta, 42 U.S.C. § 2000ff et seq.
Xeerka Fursadaha Waxbarashada Simman, 20 U.S.C. §1701-1758
Shaqsiyaadka la jiro Xeerka Waxbarashada Curyaamiinta, 20 U.S.C. §1400
C.R.S. § 2-4-401(13.5)
C.R.S. § 22-32-109(1)(kk)(II)
C.R.S. § 22-32-110(cc) iyo (dd)
C.R.S. § 22-61-101
C.R.S. § 24-34-301 et seq.
C.R.S. § 24-34-601 et seq.

Gudub Tixraacyada.:

JB – R1 – Nidaamyada Baaritaanka Cabashooyinka Ardayda oo Xaqiraada ama Dhibaateynta ah

JB – R2 - Nidaamyada Qorshaha Ardayga oo waafaqsan Qeybta 504 oo Xeerka Dhaqancelinta 1973 (“Qeybta 504”) iyo Qeybta 504 oo Nidaamyada Dhageysiga

La ansixiyay: 18-ka Maajo, 2006

Dib loo saxay: Oktoobar 23, 2014